



WACYIGELINTA BULSHADA EE LUQADAHA KALA DUWAN

Caawinta la qabsiga Finland, ee luqaddaada hooyo

WAA MAXAY WACYIGELINTA BULSHADA?

Wacyigelinta luuqadaha kala duwan waa waxbarasha loogu talagalay dadka usoo guuray Finland.

Waxabarshada waxaad ka helaysaa macluumaad ku saabsan busshada finishka oo ku baxaysa afkaaga hooyo ama luuqad uu ka qeynqaataha uu si wanaagsan u yaqaanna.

Ujeeddada/hadafka waa in qofka laga caawiyo fahanka nolol maalmeedka, adeegyada degmada iyo nolosha shaqada Finland.

Wacyigelinta bulshada waxay kuu diyaarineysaa inaad iskaa u xalliso arimahaaga. Waxaa lagu baranayaa ogaashaha xuquuqdaada iyo mas'uuliyadda ku saaran, qaabdhaqanka iyo adeegyada deegaanka.

Waxbarashada waa wadaxiriir oo kaa caawineysa waxbarashada oo ay suurogelineysaa wadhadalka bulshada.

MUDDADA IYO QAABKA

Koorsada waxay qaadanaayaa 70 saacadood, waxaana lagu qabanqaabinayaa qaabab kala duwan, sida casharro toos ah (fool-ka-fool), waxbarasho online ah (fogaan-arag), iyo waxbarasho qofku iskiis u baranayo. Waxbarashadu waxay ku baxaysaa af hooyo ee ka qeybgalayaasha ama af ay si wanaagsan u fahmayaan.

Ka qaybgalayaasha waxaa loo soo diri doonaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan jadwalka waxbarashada marka uu soo dhowaado waqtiga bilowga waxbarashada.

KOORSKAA WUXUU KA KOBANTAHAY MOWDUUCYADAN SOO SOCDA:

- Curyeynta iyo nololmaalmeedka ee Finland
- Qaabka bulshada Finland u shaqeeya
- Xuquuqda qofka iyo waajibaadka saaran
- Sinnaanta iyo ka takoorka la'anta
- Fursadaha waxbarasho iyo tababarrada
- Sida shaqo loo raadsado iyo fursadaha ganacsi (is-shaqaaleyn)
- Adeega dadweynaha iyo sida loo isticmaalo
- Arimaha lacagaha iyo aqonta nolol-maalmeedka
- Ururrada bulshada iyo howlaha iskaa wax u qabso
- Taariikhda iyo dhaqanka Finland

YAA LOOGU TALAGALAY WACYIGELINTA BULSHADA?

Wacyigelinta bulshada waxaa loogu talagalay dadka u soo guuray Finland ee ku jira bilowga hore ee la qabsiga. Waxay ka caawisaa bilaabidda nolol cusub iyo fahamka dhisidda nolol-maalmeedka ee Finland.

DIIWAANGELINTA

Ka qaybgalka koorsada waxaa lagala tashanayaa khabiirka dib u dejinta bulshada ee masuulka ka ah (kotoutumisiasiantuntija).